



Nicollet – Central Transit Alternatives



September 2012

Guud marka Mashruuca

1

Muxuu Yahay Mashruucani?

Magaalada Minneapolis, oo ay iskaashanayaan Metropolitan Council iyo Metro Transit, ayaa darsaya hawlo kale duwan si loo siiyo dadka ku safra wadiiqada Nicollet-Central adeegyo gaadiid dadwayne oo bilan. Daraasadaan waxaa lagu samayn wadiiqo 9 miles ah laga bilaabo Nicollet iyo Central Avenues, inta u dhaxeysa 46th Street (oo u dhow I-35W Transit Station) iyo Columbia Heights Transit Center ee 41st Avenue NE.

Wadiiqadu waxay martaa xarumo waaweyn oo ganacsi waxayna ku dhamaataa Nicollet Mall iyo beladka hoose ee Minneapolis; xarunta shirarka ee Minneapolis; Xarunta dhexe ee ganacsiga; “Eat Street”; the Northeast Arts District; agagaarka bariga Hennepin; the Minneapolis Institute of Arts; iyo maktabada dhexe.

Maxaa loo darsi wadiiqada Nicollet-Central?


In kastoo wadiiqada busaskoodu ay mar kasta socdaan, hadana adeegyadaasi si fudud oo laysku halays karo ugu ma adeegaan dadka socdaalaya ama gargaarka ujeedada horumarinta dhaqaale ee la rabo, kumana xidho xarumaha iyo goobaha dhamaadka waaweyn dadka socdaaleyaasha ah.

Ujeedada mashruucani waa in la hagaajiyo isku xirida, la bilo bilicda gaadiidka u adeega dadweynaha, iyo dedejinta lagu sameeyo horumarinta wadiiqada Nicollet-Central.

Muxuu yahay Hanaanka Mashruucu?

Mashruucu hada wuxuu galay wajigii hore ee ay dowlada-dhexe u dejisay mashaariicadan noocan ah. Wajiga hore waxaa la yiraa qaadaa-dhiga, waan ka hor dhismaha, talaabada xiga waxaa ka mid ah naqshada iyo deegaan dib u eegida.

Project Development Process



Hawlaha hada socda

Koox Mashruuca ka mid ah ayaa la shaqaynaysa saamileyaasha xiliga dayrta 2012 si u dejiyaan Mashruuca Ujeedadiisa iyo baahidiisa, iyo hadafkiisa iyo dulucdiisa. Kuwaasi waxay wargelin doonaan hormarinta iyo qiimaynta Mashruucyada kale, kuwaas oo dhici doona xiliga qaboobaha ee 2012/13 iyo gu’ga of 2013.

Sidee ugu lug yeaalan karaa?

Dadwaynaha taladooda ayaa la waydiin dhamaan waqtiga ay socdo daraasadu. Fursadaha aad taladaada ku bixin kartid waxaa lagu tilmaamay Mashruuca bartiisa kulan ee website:

<http://www.minneapolismn.gov/nicollet-central/>





Nicollet – Central Transit Alternatives



September 2012

Guud marka Mashruuca

1

